# OGEYSIISKA DHAQANKA ASTURNAANTA

Taariikhda hirgalidda: 14 Bisha Afraad, 2003

OGEYSIISKANI WAXA UU SHARAXAYAA SIDA WARKA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI DOONO LOONA BIXIN DOONO IYO SIDA ADIGU AAD WARKAN KU HELI KARTID. FADLAN SI TAXADIR LEH U AKHRI.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, fadlan la xidhiidh Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta (Chief Privacy Officer) adiga oo wacaya Qaybta Adeecidda (Compliance Department) oo leh lambarka 703-205-2337.

Wakhti kasta oo aad booqatid cisbitaal, dhakhtar, ama bixiye dryeel caafimaad kale, waxa diiwaangalin lagu sameeyaa booqashadaada. Caadi ahaan, diiwaangalintaa waxa ku jira calaamadahaaga, baadhitaanka iyo natiijooyinka baadhitaanka, cila-sheegidda, daweynta, iyo qorshe loogu talogalay daryeelka ama daweynta wakhtiga soo socda, iyo war la xidhiidha biilka ama kharashka. Ogeysiiskani waxa uu qabanayaa ama lagu dabaqayaa dhamaan diiwaanada daryeelkaaga ee uu soo saaray cisbitaal, ha ahaado mid uu sameeyay shaqaalaha caafimaadka, wakiilo cisbitaalka, ama dhakhtarkaaga gaarka ah. Waxa laga yaabaa in dhakhtarkaaga gaarka ahi uu leeyahay siyaasad ama ogyesiisyo ku wajahan isticmaalka iyo bixinta warkayaga caafimaadka ee lagu qoray xafiiska dhakhtarka ama kiliinigga.

## Waajibaadka 'Inova Health System'

Waxa lanaga rabaa inaanu adeecno qodobada Ogeysiiskan Dhaqanka Asturnaanta. Wakhti kasta ayaanu beddeli karnaa qodobada ogeysiiskayaga. Ogeysiiska cusub ee soo baxa waxa uu qaban doonaa dhamaan warka caafimaadka ee dhawrsan ee aanu hayno wakhigaa. Haddii aad codsatid, waxa aanu ku siin doonaa Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee la naqtiimay. Waxa nuqulka la naqtiimay aad ka heli kartaa rugtayada internetka oo ah www.inova.org, ama adiga oo soo waca 703-204-3342 codsadana in nuqulka la naqtiimay laguugu soo diro boosta ama adiga oo mid codsada wakhtiga ballantaada labaad.

## Isticmaalka iyo Bixinta

### Sidee baanu u isticmaali karnaa una bixin karnaa Warka Caafimaad ee adiga kugu sabsaan

Noocyadan soo socdaa waxay sharaxayaan tusaalooyin ah sida aanu u isticmaalno una bixino warka caafimaadka:

**Daweyn Daraadeed:** Waxa aanu warkaaga caafimadka u isticmaali karnaa in aanu ku siino daweyn ama adeegyo. Waxa aanu warka caafimaadka ee adiga kugu saabsan siin karnaa dhakhaatiir, kalkaalisooyin, farsamayaqaano, ama shaqaalaha cisbitaalka ee kale ee lug ku leh daryeelka lagugu siinayo cisbitaalka. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu dhakhtar jooga cisbitaalka siino war ku saabsan daweyntaadi hore ee lagugu daweeyay goob ay leedahay Inova haddii taasi muhimad u leedahay xaaladda cusub ee lagaa daweynayo. Waxa kale oo laga yaabaa in qaybaha kala duwan ee cisbitaalka ay wadaagaan war kugu saabsan si la isugu duwo waxyaabo kala duwan ee aad u baahan kartid, sida dawooyin, shaqo shaybaadh, cunto, iyo raajooyin.

Waxa kale oo laga yaabaa inaanu hadba wakhti ka dib warkaaga caafimaadka ee dhawrsan siino dhakhtar kale ama bixiye daryeel caafimaad kale (sida, takhasusle ama shaybaadh) kaasoo, ka dib codsi ka yimi dhakhtarkaaga, soo dhex gala daryeelkaaga isaga oo dhakhtarkaaga gargaar ka siinaya cilad-sheegidda daryeelka caafimaadkaaga ama daweyntaada. Waxa kale oo aanu dhakhtarkaaga ama bixiye daryeel caafimaad oo dambe siin karnaa koobiyada warbinada kala duwan ee ka gargaari kara inuu ku daweeyo marka aad ka baxdid cisbitaalkan.

**Lacag-bixin**: Warkaaga caafimaadka ee dhawrsan waxa loo isticmaali doonaa, haddii loo baahdo, in lagu helo lacag-bixin ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagu siiyay. Waxa taa ku jira hawlo gaar ah oo qorshahaaga caymiska caafimaadku uu qaban karo ka hor intaanay oggalaan ama bixin kharashka adeegyada daryeelka caafimaadka ee aanu kuugu talinay sida: sameynta u-banaanaan ama daboolidda faa'iidooyinka caymiska, adeegyada dib-u-fiirinta ee laguu qabtay baahi caafimaad daradeed, iyo qabashada hawlo dib-u-fiirin isticmaal. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in helitaanka oggalaansho in cisbitaalka lagu dhigo uu keeno in warkaaga caafimaadka ee dhawrsan ee muhiimka ah la siiyo qorshaha caafimaadka ama caymiska si loo helo oggalaanshaha cisbitaalka dhigista.

**Hawlaha Daryeelka Caafimaadka**: Waxa laga yaabaa inaanu isticmaalno ama bixino warkaaga caafimaadka ee dhawrsan si loo taageero hawlaha ganacsi ee Inova Health System. Hawlaha waxa ku jira, balse kuma koobna, hawlaha qiimeynta tayada, hawlaha dib-u-fiirinta shaqaalaha, tababarka ardayda caafimaadka, liisan-bixinta, hawlaha suuq-geynta iyo deeq helidda, iyo qabashada ama diyaarinta hawlo ganacsi oo kale.

Tusaale ahaan, waxa aanuu warkaagaa caafimaadka ee dhawrsan siin karnaa ardayda caafimaadka barata ee bukaanka ku arka goobahayaga. Waxa kale oo aanu miiska diiwaangalinta ku isticmaali karnaa warqad ah saxeexid soo-galid oo kaa codsanaysa inaad ku saxeexdid magacaaga sheegtidna dhakhtarkaaga. Waxa kale oo aanu kuugu yeedhi karnaa magacaaga gudaha qolka sugitaanka marka aanu diyaar u nahay inaanu ku gargaarno. Waxa aanu isticmaali karnaa ama u bixin karnaa warkaaga caafimaadka ee dhawrsan, markii loo baahdo, inaanu kula soo xidhiidhno si laguu xusuusiyo ballantaada.

Waxa aanu warkaaga caafimaadka ee dhawrsan la wadaagi doonaa cid saddexaad oo ah "shuraako ganacsi" oo hawlo kala duwan (sida, biil sameynta, adeegyada qoritaanka) u qabta Inova Health System. Marka kasta oo hawsha ka dhexeysa xafiiskayaga iyo shuruuko ganacsi ay keenayso isticmaalka ama bixinta warkaaga caafimaadka ee dhawrsan, waxa aanu sameyn doonaa heshiis qoran oo leh qodobo ilaalinaya asturnaanta warkaaga caafimaadka ee dhawrsan.

Waxa aanu warkaaga caafimaadka ee dhawrsan u isticmaali karnaa ama u bixin karnaa, markii loo baahdo, si laguu siiyo war ku saabsan daweyn beddelaad ah ama faa'iidooyin iyo adeegyo la xidhiidha caafimaadka oo laga yaabo inaad xiiseyn kartid. Waxa kale oo laga yaabaa inaanu u isticmaalno una bixino warkaaga caafimaadka ee dhawrsan hawlo kale oo ganacsi. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa inaanu magacaaga iyo adreeskaaga u isticmaalno inaanu kuu soo dirno wargeys ku saabsan adeegyada aanu bixino ama si aanu kuugu soo dirno war ku saabsan alaab ama adeegyo aanu rumeysan nahay inay faa'iido kuu yeelan karaan.

Haddii aanad doonaynin inaad heshid alaabta kor lagu sharaxay, fadlan la soo xidhiidh Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta (Chief Privacy Officer ) adiga oo soo wacaya Qaybta Adeecidda (Compliance Department) oo leh lambarka 703-205-2337 codsana in alaabta maalgalin raadinta aan laguu soo dirin.

Waxa laga yaabaa inaanu warka qaarkii (magacaaga, adreeskaaga, lambarka teleefonkaaga, tariikhda adeegyada, da'da, iyo caynka lab iyo dhedig) u isticmaalno si laguula soo xidhiidho wakhtiga soo socda iyada oo lacag deeqid loo sameynayo Inova Health System. Waxa laga yaabaa in aanu warkan siino hay'adda samafalka ee nala xidhiidhsan, iyada oo ulajeedadu tahay isla taa la soo sheegay. Lacagta deeq lagu helo waxa loo isticmaali doonaa in la kordhiyo lana hagaajiyo adeegyada iyo barnaamijyada aanu beesha siino.

Haddii aanad doonaynin in laguula soo xidhiidho hawlaha deeq ururinta, fadlan ogeysiis qoraal ah sii Inova Health System Foundation, 8110 Gatehouse Road, Falls Church, VA 22042.

**Shuraako Ganacsi**: Qaar ka mid ah adeegyada uu bixiyo Inova waxa loo maraa qandaraasyo lala galo shuraako ganacsi. Tusaalooyinka waxa ka mid noqon kara adeegyada dhakhtar ee qaybta dawada suuxinta, iyo baadhitaano shaybaadh oo gaar ah. Marka aanu adeegyada qandaraas ku bixino, waxa laga yaabaa inaanu shuraakadayada ganacsiga siino warkaaga caafimaada ee dhawrsan si ay u qabtaan shaqada aanu ka codsanay inay qabtaan ka dibna ay biilka u diraan adiga ama cidda saddexaad ee bixinaysa kharashka adeegyada la bixiyay. Si loo ilaaliyo warka caafimaadkaaga ee dhawrsan, waxa aanu shuraakada ganacsiga shuruud kula galnaa in si haboon loo ilaaliyo warkaaga. Shuruudaha ay Inova ku ilaalinayso warkaaga waxa lagu daraa Heshiisyada Shuraakada Ganacsiga ee aanu mid kasta oo shuraako ah la galno.

**Diiwaanka**: Waxa laga yaaba inaanu in war ah oo xad leh oo kugu saabsan galino diiwaanka guud ee cisbitaalka mudada aad tahay bukaan jooga cisbitaalka. Warka waxa ku jiri kara magacaaga, goobta aad cisbitaalka ka joogtid, xaaladdaada guud (sida, fiican, ma xuma, iwm.) iyo diintaada. Haddii aanad rabin in lagugu soo daro diiwaanka cisbitaalka fadlan shaqaalaha qoritaanka ama Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta ka codso Foomka Codsiga Ka-reebitaanka (Request to be Excluded Form).

**Dadka Shaqo ku Leh Daryeelkaaga ama Bixinta Kharashka Daryeelkaaga**: Waxa laga yaaba inaanu war caafimaad oo kugu saabsan siino saaxiib ama xubin qoys oo shaqo ku leh daryeelka caafimaadkaaga ama gargaar ka geysta bixinta kharashka daryeelkaaga. Waxa kale oo laga yaabaa inaanu war caafimaad oo kugu saabsan siino cid gargaar ka geysanaysa hawl wax-ka-qabasho aafo si qoyskaaga loo siin karo ogeysiis ku saabsan xaaladdaada, caafimaadkaaga iyo goobta aad joogtid. Haddii aad rabtid inaad xad u yeeshid siinta warkaa saaxiibada ama xubnaha qoyska, waxa aanu kaa codsan doonaa inaad magacawdid hal qof oo aanu warkaasoo kale siin karo. Ka dib adiga ayaa masuul ka ah inaad qofkaa siisid fariin ku saabsan sida uu warkaa adiga kugu saabsan u siin karo ciddii kale ee xiiseynaysa.

**Cilmi-baadhis:** Waxa laga yaabaa inaanu warka siino cilmi-baadheyaal marka guddi dib-u-fiirin hay'adeed ay fiirisay qorshaha cilmi-baadhista, soo saartay hab-dhaqan lagu sugayo asturnaanta warka caafimaadkaaga, isla markaana aqbashay cilmi-baadhistooda.

**Isgaadhsiinta Wakhtiga Soo Socda:** Waxa laga yaabaa inaanu kula soo xidhiidhno iyada oo la siticmaalayo wargeysyo, waraaqo diris ama habab kale sababtuna tahay ikhtiyaar daweyn, war caafimaadka la xidhiidha, barnaamijyo xakameyn cudur, barnaamijyo caafimaadqabid, ama mashaariic ama hawlo ku saleysan beesha oo goobahayagu ka qaybgalayaan.

**Nidaamka Daryeelka Caafimaadka ee Habeysan:** Inova Health System iyo bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee xidhiidhka la leh ayaa soo habeeyay kuuna soo bandhigaya dukumentigan isaga oo ah ogeysiis wada jir ah. Warka waxa loo wadaagi doonaa sidii loogu baahdo si loo qabto daweyn, lacag-bixin iyo hawlaha daryeelka caafimaadka. Waxa laga yaabaa in dhakhaatiirta iyo daryeel bixiyeyaashu ay xafiisyadooda ku helaan warka caafimaadka ee

dhawrsan si gargaar looga geysto dib-u-fiirinta daweyntii hore sababta oo ah waxa laga yaabaa inay saameyso daweynta wakhtigaa lagu siinayo.

**Hal Cid oo Isku Jirta:** Marka la eego ulajeedooyinka kaliya HIPAA, dhamaan meelaha ay leedahay ama ay xukunto 'Inova Health system' waxa laga soo qaadi doonaa inay yihiin Hal Cid oo Isku Jirta (Single Covered Entity). Warka caafimaadka ee dhawrsan waxa la siin karaa shaqaalaha cisbitaalada ee goobaha xidhiidhka la leh Innova marka loo baahdo si loo qabto daweyn, lacag-bixin iyo hawlo daryeel caafimaad. Waxa laga yaabaa in daryeel bixiyeyaasha jooga goobaha kale ay goobahooda ku helaan warka caafimaadka ee dhawrsan ee xafiisyadood si gargaar looga geysto dib-u-fiirinta daweyntii hore sababta oo ah waxa laga yaabaa inay saameyso daweynta wakhtigaa lagu siinayo. Fadlan kala xidhiidh Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta wixii war ah ee ku saabsan goobaha gaarka ah ee ka tirsan halka cid ee isku jirta.

**Sida uu farayo sharcigu**, waxa kale oo laga yaabaa inaanu isticmaalno oo siino warka caafimaadka noocyadaha ciddahan soo socda, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn:

- Food and Drug Administration (Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka)
- Maamulada Caafimaadka Dadweynaha ama sharciga ee shaqo ku leh ka-hortagga ama xakameynta cudur, dhaawac ama naafo
- Goobaha xabsiyada
- Magdhowga Shaqaalaha (Workers Compensation)
- Hay'adaha deeqidda xubno jidh
- Madaxda taliska ciidanka
- Hay'adaha kormeeridda caafimaadka
- Maamuladda tacsida, baadheyaasha sababaha geerida iyo maamuleyaasha caafimaad
- Hay'adaha Nabad-sugidda iyo Wardoonka ee qaranka
- Adeegyada Ilaalinta Madaxweynaha iyo Kuwo Kale

**Fulinta Sharciga/Hawlaha Sharci:** Waxa laga yaabaa inaanu warka caafimaadka u bixino ulajeedooyin fulin sharci sida uu rabo sharcigo ama iyada oo laga jawaabayo amar-maxkamadeed oo sax ah.

**Shuruudaha Gobol u Gaar ah:** Gobolo badan ayaa leh shuruudo soo-sheegis oo ay ku jiraan hawlo ku saleysan dadweynaha oo la xidhiidha hagaajinta caafimaadka ama yareynta kharashka daryeelka caafimaadka. Gobolada qaarkood waxay leeyihiin sharciyo gooni ah oo dabiqi kara shuruudo sharci oo dheeraad ah. Haddii xeerarka asturnaanta ee Gobolka Virginia ay ka adag yihiin xeerarka asturnaana ee Federalka, sharciga Gobolka Virginia ayaa muhimadda ka leh sharciga Federalka.

## Xuquuqdaada Warka Caafimaadka

Inkasta oo diiwaankaaga caafimaadku uu yahay maal u leeyahay bixiyaha daryeel caafimaad ama goobta qortay, waxa aad **xaq u leedahay**:

- **Fiiri oo Koobigaree:** Waxa aad xaq u leedahay inaad fiirisid oo koobigareysid warka caafimaad ee aanu hayno ee loo isticmaali karo in go'aamo lagaga gaadho daryeelkaaga. Caadi ahaan, waxa tan ku jira diiwaanada caafimaadka iyo kuwa biilasha, laakiin kuma jiraan qoraalada daweynta maskaxda.

Waxa laga yaabaa inaanu diidno codsigaaga fiirinta iyo koobigareynta diiwaanadaada marka ay jiraan xaalado aad u tiro yar oo cayiman. Haddii laguu diido helitaanka warka caafimaadka, waxa aad codsan kartaa in diidmada dib loo fiiriyo. Xirfadle daryeel caafimaad oo liisan leh oo aan lug ku lahayn diidmadii codsigaaga ee hore ayaa ay Inova Health System dooran doontaa si uu dib-u-fiirin ugu sameeyo codsigaaga iyo diidmada. Waa aanu adeeci doonaa natiijada dib-u-fiirinta.

- **Sixid**: Haddii aad dareensan tahay in warka caafimaadkaaga ee faylka noogu jira aanuu sax ahayn ama dhameystirnayn, waxa aad naga codsan kartaa inaanu saxno warka. Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid sixid in alaale inta Inova Health System ay warka hayso.

  Waxa laga yaabaa inaanu diidno codsigaaga sixitaanka, haddii taasi dhacdana waxa lagu soo ogeysiin doonaa sababta diidmada.

- **Xisaabinta Bixinta:** Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid xisaabinta wixii ah bixin aanu ku sameynay warka caafimaadkaaga ee aan ahayn ulajeedooyin daweyn, lacag-bixin ama hawlo daryeel caafimaad.

- **Codsiga Xadeynta:** Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid xad-u-yeelista lagu sameeyo warka caafimaadka ee aanu isitcmaalno kaana bixino iyada oo sababtu tahay daweyn, lacab-bixin ama hawlo daryeel caafimaad.

  Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad codsatid xad-u-yeelis lagu sameeyo warka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee aanu siinayno qof lug ku leh daryeelkaaga ama bixinta kharashka daryeelka, sida saaxiib ama xubin qoys. Tusaale ahaan, waxa aad codsan kartaa in aanaanu isticmaalin ama bixin war ku saabsan shaqada qalitaankaaga.

  **Qasab naguma ah inaanu oggalaanayo codsigaaga**. Waa in dhamaan codsiyada xad-u-yeelista warka caafimaadkaaga ee aanu isticmaalno ama bixino ee ku saabsan daweyn, lacag-bixin ama hawlo daryeel caafimaad loo soo gudbiyo Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta. Qofka kaliya ee oggolaan kara xad-u-yeelistaa waa Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta ama ku-simihiisa. Haddii aanu oggalaano, waa aanu adeeci doonaa codsigaaga haddii aan warka loogu baahanayn in lagu siiyo daweyn degdeg ah.

- **Codsiga Isgaadhsiin Qarsoodi ah:** Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid inaanu marka ay jiraan arrimaha caafimaadka qaarkooda kuula soo xidhiidhno hab gaar ah ama goob gaar ah kugula soo xidhiidhno. Tusaale ahaan, waxa aad codsan kartaa inaanu kugula soo xidhiidhno goob aan ahayn gurigaaga ama Boosta Maraykanka. Codsiyada noocaasa waa inay ahaadaan qoraal ahaan laguna soo daro adrees laguugu soo hagaajiyo biilasha adeegyada iyo waraaqaha kale ee la xidhiidha bixinta biilashada adeegyada. Waxa muhiim ah inaad ogaatid in Inova Health System ay xaq u leedahay inay kugula soo xidhiidho hab kasta oo kale iyo goobo kale haddii aad ka soo jawaabi weydo isgaadhsiin naga timi oo u baahan jawaab. Ogeysiis ayaanu kuu soo diri doonaa iyada oo la raacayo codsigaagii hore ka hor inta aanaanu isku dayin inaanu kugula soo xidhiidhno hab kale ama goob kale.

- **Koobi Warqad ah oo ah Ogeysiiska:** Waxa aad xaq u leedahay koobi warqad ah oo ah ogeysiiskan. Waxa aad naga codsan kartaa inaanu ku siino koobiga ogeysiiskan wakhti kasta, xiita haddii aad oggalaatay inaad ogeysiiskan u heshid hab elegtaroonig ah.

Waxa aad koobiga ogeysiiskan ka heli kartaa rugtayda internetka oo ku taala http://www.inova.org.

Si aad u isticmaashid xuquuqdaada, fadlan foomamka loo baahan yahay ka codso Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta codsigaagana keen isaga oo ah qoraal.

ISBEDDELADA KU YIMAADA OGEYSIISKAN

Waxa aanu xaq u leenahay inaanu beddelno ogeysiiskan wakhti kasta. Ogeysiiska la naqtiimay ama la beddelay waxa lagu dabiqi doonaa warka aanu markaa hayno iyo waliba wixii war ah ee aanu helno wakhtiga soo socda. Ogeysiiska wakhtigan jira waxa lagu soo dhajin doonaa goobaha Inova waxana ku jiri doona taariikhda hirgalinta. Waxa taa dheer mar kasta oo aad iska diiwaangalisid ama lagu dhigo cisbitaalka iyada oo sababtu tahay daweyn ama adeegyo daryeel caafimaad adiga oo ah bukaan-jiif ama bukaan-socod, waxa aanu ku siin karnaa nuqulkii ugu dambeeyay ogeysiiska. Waxa suurogal kuu ah inaad wakhti kasta nuqulkii ugu dambeeyay ka heshid rugtayada internetka oo ku taala http://www.inova.org ama waxa aad soo wici kartaa 703-204-3342 codsan kartaana in nuqulkii la naqtiimay ee ugu dameeyay ee ogeysiiska laguugu soo diro boosta.

DACWADO

Haddii aad rumeysan tahay in xuquuqdaa asturnaanta lagu tuntay, waxa aad dacwad dhigan kartaa cisbitaalka adiga oo la xidhiidhaya Qaybta Adeecidda (Compliance Department) weydiisanayana inaad aragtid Sarkaalka Koobaad ee Asturnaanta (Chief Privacy Officer) ama waxa aad dacwad u geysan kartaa Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka (Secretary of the Department of Health and Human Services). Waa in dhamaan dacwadaha lagu keeno qoraal ahaan.

**Laguguma ganaaxi doono dacwad aad xereysatay.**

ISTICMAALADA KALE EE WARKA CAAFIMAADKA

Waxa lagana rabaa inaanu hayno diiwaanada ku saabsan daryeelka aanu ku siinay. Inova Health System waxay wixii ah isticmaalo iyo bixino kale ee ku saabsan warka caafimaadka ee aanuu daboolaynin ogeysiiskani ama sharciyada na qabanaya sameyn doontaa kaliya marka lagaa hayo oggalaansho qoran. Haddii aad na siisid oggalaansho inaanu isticmaalno ama bixino war caafimaad oo kugu saabsan, waxa suurogal kuu ah inaad dib uga noqotid oggalaanshahaa wakhti kasta. Haddii aanu helno dib-uga-noqosho qoraal ah oo ku saabsan oggalaanshahaaga, waxa aanu joojin doonaa isticmaalka ama bixinta warka caafimaad ee hore aad u oggalaatay. Suurogal nooma ah inaanu dib uga noqono bixin aanu hore u sameynay iyada oo la raacayay oggalaanshahaaga.

**SARKAALKA KOOBAAD EE ASTURNAANTA**

Lambarka teleefonka: 703-205-2337

**Somali**